

TALEEFANKA LACAG LA'AANTA AH:
1-800-337-7222

TALEEFANKA LACAG LA'AANTA AH
EE DADKA DHAGAHA WAX KA QABA
(TTY):1-800-263-7776

www.ontario.ca/budget



DHEEFTA ONTARIO TRILLIUM (ONTARIO TRILLIUM BENEFIT): XULASHO KA BADAN OO LOOGU TALAGALAY DADKA

Dawladda ayaa soo jeedineysa inay siiso dadka ikhtiyaar ay wax ku kala doortaan, laga bilaabo 2014, iyo inay ku helaan Dheefta Ontario Trillium (Ontario Trillium Benefit ama OTB) hal bixin iswadata ama bixin bishii kasta ah.

OTB-ga ayaa isku raacisa hal duuduub ahaan saddex naqdiyo cashuur.

Dad badan ayaa soo dhaweeya gargaarka bishii kasta ah kolba markay biilashu u yimaaddiin; hase ahaate, dadka qaarkood ayaa doorbida bixin hal jeer ah.

KA CAAWINTA DARAWALLADA ONTARIO SIDII AY U DHAQAALAYSAN LAHAAYEEN LACAGTA

Dawaladda ayaa ku sii wadaysa guusheedii u dejinta qiimaha caymiska gaadiidka la kaxayso in ka badan illaa sagaal milyan oo darawal gudaha Ontario iyada soo jeedineysa:

- ☑ Xeeladla dhimayo qiimaha iyo saamiga oo naaqusi doonta qaddar-xilliyeedka gaadiidka la kaxaysto looguna talagalay isticmaalayaasha ah illaa boqolkiiba 15 marka la isku celceliyo.
- ☑ In looga baahdo caymis bixiyeyaasha inay dadka u fidiyaan heerar ka naaqusan darwallada badaadada leh.
- ☑ Weerar joogto ah oo lagu qaado xatooyada caymiska gaadiidka si loo dhowro isticmaalayaasha oo loo naaquso kharashyada.
- ☑ Tallaabooyin la xisaabtan leh oo waadax ah oo dib loogu eego qiimayaasha bahda meheradda iyo sidii loo hubin lahaa in dhaqaalaysiga loo gudbiyo isticmaalayaasha.



ONTARIO BARWAAQO & CADAALAD AH

MIISAANIYADDA ONTARIO

2013





Miisaaniyadda 2013 ayaa ah qorshaha cusub ee Ontario ee lagu xoojinayo dhaqaalaha gobolka iyo qof kastaana u helo fursad u ku guuleysto.

Waxqabadka dhaqaale ee Ontario ayaa ka sii xoog badan marka qof kastaa haysto fursad shaqo lacag lagu helo, iyo inay ka qaybgalaan nololsha beelaha iyo inay gacan ka geystaan barwaaqo helitaanka gobolkeena.

Kaalinta dawladda ee shaqo abuurka ayaa dhiirrigalinta jawiga qumman ee loogu talagalay meheradaha iyo dadka meheradayaasha inay ku dhiirri-galaan, oo maalgashadaan, shaqooyin abuuraa oo socodsiiyaan waxyaabo cusub.

JIDKA LOO MARO DHEELLI-TIRKA

Baabi'inta difisidka ayaa ah wax kaliya ee ugu muhiimsan ee ay qaban karto dawladdii sidii xasilin lahayd barwaaqada Ontario.

Dawladda Ontario ayaa u heellan baabi'inta difisidka illaa 2017-18.

Difisidka 2012-13 ayaa lagu qiyaasayaa inuu noqdo \$9.8 bilyan — taas oo ah \$5.0 bilyan ka horumar marka loo eego saadaalintii *Miisaaniyaddii* sannadkii hore.

Ficilka ay qaaday dawladdu ayaa u oggolaatay inay ka warbixiso difisid ka hooseeya kuwa loo saadaaliyay afar sano isku daba xiga.

Kobaca kharashaynta barnaamij gudaha 2012-13 ayaa loo qiyaasayaa inuu ka yaraado hal boqollay sannadkii labaad ee isku xigay.

QORSHAHA LOOGU TALAGALAY SHAQOYINKA IYO KOBACA

Qorshaha Ontario ee loogu talagalay ku sii dul dhiska shaqooyinka ee kobaca aasaas dhaqaale adag oo lagu taageero siyaasadda dawladda iyo maalgashiyadu lix arrimood oo ugu muhiimsan:

1. Jawi meheradeed oo tartamitaan leh —Gacan-qabashada nidaam cashuur tartamitaan leh iyo qawaaniin wax-ku-ool leh ayaa horumariya maalgashiga meheradda cusub ee loogu talagalay shaqo abuurka iyo Kobaca dhaqaalaha.
2. Kaabayaal casri — iyada oo la magashado gaadiidka tareenka, waddooyinka, dugsiyada iyo isbitaallada oo u ah aasaas muhiim ah dhaqaalaha wax soo saarka badan.
 - Dawladda ayaa qorsheyneysa inay ku maalgaliso in ka badan \$35 bilyan muddada saddexda sano ee soo socota ah meelaha xaasaasiga ee ah sida gaadiidka, daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada si loo taageero in ka badan 100,000 oo shaqo sannad kasta gobolka oo idil.
3. Xoog-shaqaale oo si sare ah u xirfadeysan — iyada oo la magashado xirfadaha iyo waxbarashada, iyo waliba abuurka shaqada loogu talagalay dhallinta, ayaa hubineysa inay dadka gobolku shaqeyn karaan oo ay barwaaqoobaan.
 - Dawladda ayaa soo jeedinaaya Xeelad Shaqooyin Dhallinyaro oo dhammaystiran lehna maalgashiyada ah \$295 milyan in muddo laba sano gaareysa sidii loo horumarin lahaa fursadaha shaqada, meherad-wacnida iyo wax cusub soo saarka loogu talagalay Ontario.
4. Horumarinta meherad-wacnida iyo wax cusub soo saarka —xoojinta kartida Ontario ay u leedahay inay u beddesho fikradaha bucs Shirado iyo adeegyo cusub oo loogu talagalay dhaqaalaha caalamiga ah.
5. Caalami noqosho — iyada oo lagala shaqeeyo meheradaha sidii ay u fidin lahaayeen marin u helkooda suuq ee bucs Shiradaha iyo adeegyada waxa ka baxsan xadadka Ontario ee ah gobollada kale, Maraykanka iyo dhaqaalayaasha soo kobcaya.

6. Beelo firfircoon oo xoog leh — ka caawinta inay dhammaan beelaha iyo dhaqaalayaasha degmeed ka faa'iideystaan shaqo abuurka iyo kobaca dhaqaalaha.

BULSHO CADAALAD AH

Waxqabadka dhaqaale iyo qaab-dhismeedka Ontario ayaa xitaa ka sii xoog badnaan doonta marka qof kasta leeyahay fursad ay ugu guuleystaan waxqabadkooda ugu sareeya.

Lagu Sii Wado Bixinta Adeegyada Dadweyne ee Tayada-Sare leh iyada oo:

- Horumarinta marin u helka adeegyada daryeel caafimaad tayo-sare leh oo loogu talagalay qof kasta.
- Lagu sii dul dhiso tii hore guusha ardayga oo ay ka midka yihiin si buuxda u hirgalinta dugsiyada barbaarinta (kindergarten) maalinta buuxda ah iyo kordhinta ku takhasuska xirfadaha ay ardayda da'da yari ugu baahan yihiin inay guuleystaan.
- La Bixiyo Naaqus 30% ah deeqda Lacagta Tacliinta laga bixiyo sidii loogu horumarin lahaa marin u helka tacliinta ka sarreysa dugsiyada sare.



Waxa La Soo Jeedinayaa in La Kordhiyo Fursadaha loogu talagalay dadka iyada oo:

- La soo saaro ka-dhaaftaan \$200 bishii kasta ah kasbadka sidii loo naaqusi lahaa caqabadaha horyaal shaqada loogu talagalay dadka qaata gargaarka bulsheed.
- Iyada oo la kordhiyo saamiyada gargaarka bulsheed, oo ay jiraan u-kordhin la siiyo dadka qaangaarka ee kalida ah ee aan carruurta lahayn ee qaata Hawlaha Ontario (Ontario Works).
- Iyada oo la kordhiyo saamiyada gargaarka bulsheed, oo ay jiraan u-kordhin la siiyo dadka qaangaarka ee kalida ah ee aan carruurta lahayn ee qaata Hawlaha Ontario (Ontario Works).
- In la taageero fursado intaa ka badan oo loogu talagalay dadka Asalka dalka ku ahaa iyada oo si toos ah wax looga qabto dib-u-habaynta gargaarka bulsheed, iyo taageero intaa ka badan oo loogu talagalay guriyeynta iyo waliba wax ka beddelka adeegyada in si ka wanaagsan loola kulmo baahida carruurta iyo dhallinta dadka Asalka dalka ku ahaa.

